

Barnaamijyada loo hayo caruurta ku cusub wadanka



www.mcaf.nb.ca

Ururka Dhaqamada Badan ee Fidirikton Inc. (UDHBF) waxey sameeyaan barnaamijyo badan oo lagu soo dhoweynayo caruurta ku cusub wadanka ee da, doodu gaareyso 12 sano kuwaasoo isugu jira:

■ Daryeelka Caruurta Cusub (DCC)

Dadka cusub ee xaqa u leh, waxey u heli karaan daryeel caruurtooda ay da, doodu tahay 6 billood illaa 5 sano marka ay ka xaadirayaan fasalada luuqadaha. Barnaamijka dhaqdhaqaaqiisa iyo agabkiisu wuxuu taageera horumarinta luuqada iyo xirfadaha bulshada oo tayo leh.

■ Barnaamijyo Waxbarasho

Gudaha Niyuu Baraaniswiik, ardeyda cusub iyo waalidiinta waxey xaq u leeyihiin in ay kala doortaan waxbarashada habka Faransiiska iyo Habka Ingiriiska.

Iskuulada ingiriiska ee degmada waxey ku bixiyaan waxbarashada Ingiriisi iyo Faransiiska labadaba. **Shaqaalaha Dejinta ee Iskuulada** (SHDI) waxey caruurta iyo qoysaska ku xiraan adeegyada, agabka iyo warbixinta iskuulada ee bulshada dhexdeeda si ay sare ugu qaado dejinta iyo guusha ardeyga.

Iskuulada Faransiiska ee degmada, **Barnaamijka Xiriirka ku hadalka Faransiiska** (BXF) ee shaqaalaha UDHBF ayaa waxey ka taageeraan baahida dejinta ee caruurta iyo qoysaska gelaya iskuulada iyo bulshada looga hadlo Faransiiska.

Shaqaalaha SHDI iyo BXF waxey ka caawinayaan caruurta wadanka ku cusub in ay awood u helaan:

- Kooxaha Shaqada guriga
- Macalimiinta qaaska ah
- Barnaamijyada Iskuulka ka danbeeya
- Goobaha Xagaaga iwm



Barnaamijyada Iskuulka ka Danbeeya ee UDHBF waxey bixiyaan hawlo bulsho, hal abuur iyo kuwo wax barasho oo tayeysan galabtii Isniinta Illaa Jimcaha (da' da 5-12) inta lagu jiro sanad dugsiyeedka.

Barnaamijyada Kooxda

Caruurta da, doodu tahay 5 ilaa 12 sano waxey ku biiri karaan barnaamijyada kooxaha ee UDHBF. Caruurta waxey sameystaan saaxiibo cusub, waxey wax badan ka baranayaan bulshadooda, waxeyna sare u qaadaan xirfadahooda hogaaminta.

■ Isboortiska

Barnaamijka ka Qeybgalka Isboortiska ee Dadka Cusub wuxuu la shaqeeyaa guruubada ciyaaraha ee bulshada si loo siiyo caruurta fursad ay ku noqdaan kuwo firfircoon, barta xirfado cusub, kuna qaata waqti fiican isboortisyo badan sida kubada cagta, ciyaaraha barafka, dabaasha, teniska iwm.

■ Farshaxanka, Musikada, Ciyaaraha, iyo Tiyaatarada

Caruurta leh wax xirfad ah waxey ku biiri karaan fasalo badan oo kala duwan oo ay hogaaminayaan farshaxano deegaanka u dhashey, farshaxano muusikada ah, iyo bandhigayaal.




Abaabulk farshaxanka waxey bixiyaan tiyaataro ama maadeys, gabayo, gitaar iyo organka muusikada, ciyaaro, iyo fasalo sawir oo loogu talagaley caruurta dadka cusub.

■ Goobaha Xagaaga

Laga soo bilaabo 1994, Xerooyinka Xagaaga ee Ururka Dhaqamada Badan ee Fidirikton, waxey u sameeyaan caruurta da, doodu tahay 5-12 sano kuwaasoo kasoo jeeda dhaqamo kala duwan, isuguna jira kuwo cusub, iyo kuwo mudo dheer deganaa Canada ama ku dhashey khibrad tayo leh oo ay ku ogadaan uguna dabaal degaan isku mid ahaanshaheena Iyo kala duwanaanshaheena. Inta lagu guda jiro 6'da usbuuca ee Xerooyinka Xagaaga ee dhaqamada kala duwan, caruurta waxey sameyaan isweydaarsi dhaqan, saaxiibtinimo, in ay la hawlgalaan dhaqamo kale ayna kororsadaan fahamka kala duwanaanshaha marka ay ka qeybgalayaan muusikada, farshaxanka, ciyaaraha Iyo isboortiska.

■ Yoolkeena/hiigsigeena

In ay caruurta ka qeybgalaan barnaamijyada sare u qaadaya is dhexgalkooda iyo ka qeybgalka bulshadooda cusub.



Ururka Dhaqamada Badane Fidirikton Inc.

28 Saunders Street
Fidirikton, Niyuu baraaniswiik
Canada E3B 1N1

Email: children@mcaf.nb.ca

Tell (506) 454-8292

Waxaa maalgeliyey:

 Immigration, Refugees and Citizenship Canada

 New Brunswick

www.mcaf.nb.ca

